# KONDOLOOMA (fiix malaxeed), hagitaanka bukaanka

- Kondolooma waxaa sababa fayruska dadka ee pappilooma (HPV), kaas oo ah noocyo badan oo kala duwan .
- Qiyaasto 80 boqolkiiba dadka ayaa waxaa inta ay nool yihiin ku dhawaca cudurka HPV, laakiin intooda badan waxa caabuqa uu keeno uga bogsoodaan difaaca jirkooda iyadoo aan laga daaweyn middo dhowr sano gudohodd ah. Cudurka HPV waa mid ku badan dhallinyarada qaangaarka ah.
- Wakhtiga soo bixidda kondolooma laga billaabo marka cudurka la qaado illaa iyo calaamadaha cudurka waa mid isbedbeddela oo u dhexeeya bilo illaa iyo sannado. Suuraggal ma ahan in wakhtiga rasmiga ah ee cudurka la qaaday la ogaado.
- Haddii ay lamaanaha galmadu badnaayeen, waxaa kordhaya halista lagu qaadayo kondolooma.

**kahortagga qaadista cudurka**

- Kondhomka iyo difaaca galmada afka ayaa qayb ahaan cudurka kaa difaacaya, si kastaba ha ahaatee, difaaca laga helayo ma ahan mid buuxa. Isticmaalka kondhomka iyo difaaca galmada afku waxay si kastaba ha ahaatee, kaa difaacayaan cudurada kale ee galmada lagula kala qaado.
- Wakhtigan hadda la joogo, tallaalka (Cervarix®) ee ku jira barnaamijka tallaalka ee caruurta iyo dhallinyarada wuxuu si fiican u difaacayaa kansarka marinka ilmagaleenka iyo wejigiisa koowaad, laakiin ma difaacayo kondoloomaga fiixda oo kale ah.  Tallaalka (Gardasil 9®) ee warqadda dhakhtarka looga soo gato farmashiyaha ayaa si fiican u difaaca kondoloomaga fiixda oo kale ah. Waxaa kale oo ay tallaaladu difaacaan kansarada siilka iyo qaybta bannaanka ee ilmagaleenka ku dhaca waxayna sida muuqata kahortagaan sidoo kale kansarada HPV ka dhashay ee futada, guska, madaxa iyo soonaha qoorta.
    - Labada tallaalba teraabiya ma ahan, yacni ma daaweeyaan kondolooma ama cudurka HPV.

**Kondolooma waxaa lagu kala qaadaa**

- xiriirka tooska ah ee xuubka ama maqaarka ee xubnaha taranka ama soonaha jenitaalka ah iyo galmada gacmaha loo adeegsado
- galmada siilka iyo futada
- galmada afka

Caabuqa kale ee maqaarka iyo xuubka ama dhaawacyada isku wakhtiga ah ayaa kordhiya halista qaadista cudurka.

**Calaamadaha**

- caabuqa HPV waa mid ku dhowaad markasta aan calaamad cudur lahayn.
- Noocyada fayruska ee halistoodu yartahay waxay sababi karaan midabo maqaar oo ishu qaban karto oo sidii kaabash ubaxeed ah ama komdolooma fiixeed oo kale ah, yacni fiix malaxeedyo
    - ku yaal qaybta bannaanka ee ilmagaleenka
    - buurada hoosteeda, guska geeskiisa
    - afka tuubada kaadida
    - wareegga futada
    - Inkastoo ay kondoloomyada muuqda ay sababi karaa cillad quruxeed, laakiin waa kuwa aan dhib lahayn marka laga eego dhinaca caafimaadka.
- Cudurka fayruska papilloma ee tuubada ilmagaleenka iyo isbeddellada unugyada waa kuwa caadiyan aan calaamado lahayn. Nuucyada fayruska halistoodu sarreyso waxay caabuqa daba-dheeraada ku sababi karaan wejiga koowaad ee kansarka, waxayna sidaas aasaas ugu samaynayaan dhalashada kansarka.

**Baaritaanka iyo daaweynta**

- Kondoloomka muuqda waxaa lagu caddeeyaa isbeddelka ku yimaada maqaarka iyo xuubka. Haddii loo baahdo, dhakhtarka ayaa cad saami ah ka qaadi kara.
- Isbeddelka kondolooma ee muuqda waa la daaweyn karaa, haddii aanay iskood u baabi'in.
- Kondoloomka fiixda oo kale ah waxaa lagu daaweyn karaa guriga iyadoo la daaweynayo meesha ay ku yaalaan.
    - Dhakhtarka ayaa qoraya boomaayo ama daawo milan ah, rugta caawimaadkuna waxay ku siinaysaa tilmaamah daaweynta ee rasmiga ah.
- Kondolooma waxaa sidoo kale lagu daaweeyaa daaweynta khaaska ah ee qaboojinta iyo laserka ee qaabilaadda isbitaal yaraha cudurada galmada. Dhakhtarka rugta caafimaadka ayaa warqad gudbin ah kuu qoraya ama adiga naftaada ayaa la xiriiri kara isbitaal yaraha cudurada galmada ee HUS, maalmaha shaqada saacadda u dhexeysa 8-10,
  tel. 09 471 86 220 (linkiga bogga HUS: https://www.hus.fi/potilaalle/sairaalat-ja-toimipisteet/iho-ja-allergiasairaala/sukupuolitautien-poliklinikka-iho-ja )
- Cudurka HPV ee daba-dheeraaday wuxuu sababi karaa isbeddelka unugyada marinka ilmagaleenka, kuwaas oo lagu caddeyn karo saamiga cadka laga soo jaro unugga (baaritaanka papa).
    - Dumarka jira 25-65 sano waxaa shantii sanaba mar Helsinki loogu yeeraa baaritaanka guud ee kansarka marinka ilamgaleenka. Kuwa 30 sano kayar waxaa lagu sameeyaa baaritaanka papa kuwa ka sii weyna waxaa lagu sameeyaa baaritaanka fayruska papillooma. Degmooyinka qaar waxaa baaritaanka guud lagu sameeyaa dumarka jira 30-65 sano. Ujeedada baaritaanku waa in wakhti hore la todeta caddeeyo halista kansarka ee qaybta marinka ilmagaleenka.

- Illaa iyo hadda ma jiro baaritaan shaybaar oo lagu ogaan kari lahaa, in qofka aan wax calaamad ah lahayn uu qabo cudurka HPV:ga ku dhaca agagaarka fytada, bannaanka xubinta taranka ama dhiinta.
- Qaadista cudurka HPV ee ragga lama baaro, sidaas darteed looma baahna in ninka aan calamaad cudur lahayn in uu lamaanihiisa oo HPV bositif ah darteed ah baaritaan u aado.
- Isticmaalka kondhomka ee dadka uu ka dhexeeyo xiriirka joogtada ah lama caddayn in uu dedejiyo ka bogsashada cudurka.
- Si looga hortago fiditaanka cudurka, waxaa quman in marka la samaynayo xiriirka galmada ee aan joogtada ahayn la isticmaalo kondhom iyo difaaca galmada afka. Si kastaba ha ahaatee, difaaca laga helayo kondhomka/difaaca galmada afka ma ahan mid buuxa.